Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 7-aad
Documentiga Kalfadhiga 7-aad kulankiisa:11-aad Tr:21.11.2015

Kalfadhiga 7-aad

Kulankiisa:11-aad, sacada furitanka.11:15 gh, sacada xiritanka.1:00 gd.

Guntinta:143 xildhibaan

Ajendaha:-

1.Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka

2.Ansixinta Ajendaha

3.Dooda Qaraarka Warbixinta Guddiga Maaliyadda ee Dakhliga iyo Kharashka Dowladda Ee bilaha Janaayo ilaa Maajo,2015.

4.Akhrinta 2aad Hindise Sharciyeedka lagu dhisayo Maxkamada Dastuuriga Shir-Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeenka 1-aad Golaha Shacabka Jamhuuriyadda F.S. Mudane:Jeylani Nuur Iikar.

1.Waxaa shirka furay Guddoomiye ku xigeenka 1-aad Golaha Shacabka J.F.Soomaaliya Mudane:Jeylani Nuur Iikar,waxaa lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uu akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir.

2.Guddoomiyaha Golaha,wuxuu xildhibaanada uu u soo jeediyay in ay ansixiyan ajendaha Xildhibaanada wey ansixiyan ajendaha.

Xildhibaan:Maxamed C/laahi Fadhaye,wuxuu soo jeediyay,talo soo jeedintii golaha wasiiradda kuma lifaaqna guddi ayaa iska wata waa qeyru sharci,waa in laga saara ajendaha sharciga maxkamadaha.

Xogha'yaha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Mudane:C/kariim Xaaji Buux,wuxuu shegay,Hindise Sharciyeedkan waxaa keenay Wasaaradda Caddaalada Diinta waxaa la keenay Tr:25.5.2013, akhrintiisa 1aad wuxuu maray 2014kii, wax lala noqday majiraan.

Xildhibaan:Fadhaye,wuxuu sheegay,si lama filaan waxaa la noqday Xukuumadii Cabdi wali.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,waxaa noo qaabilsan **Xogha'yaha Baarlamaanka** koobina waa la idiin siinaya.

Xildhibaan:Cabdi Xaashi C/laahi,wuxuu soo jeediyay, hadii aynaan sharciga dhowrin wax inoo hagaagaya majiraan, Hindise Sharciyeedkan ma waafaqsana sharciga ee dib haloo celiyo.

Xildhibaan: Aadan Sadiiq,Guddoomiyaha Guddiga Cadaaladda,wuxuu soo jeediyay,Hindise Sharciyeedkan ha kad ayaa galay ee lama joojin sidaas ayaan howsheenii ku sii wadaney oo aan soo diyaarinay Hindise sharciyeedkan Maxkamadaha Dastuuriga,waadna ogtihiin qiimaha uu leeyahay sharcigan waana muhiim in la dhiso sharcigaan, waqtina waa nagu yar yahay hadii la yiraahdo dib haloo celiyo wad ogtihiin waqti ma heysano ee aan ansaxino sharcigaan.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu sheegay, maadama aad diidan Hindise Sharciyeedkan wan ka saarnay Ajendaha.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda.

3.Xildhibaan: Samaan Skeekh Daahir,wuxuu soo jeediyay,Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda ayaa akhriyay qaraarka Baarlamaanka ee ku saabsanaa xisaab xirka daqliga iyo qarashka dowlada bilihii Janaayo ilaa Maajo 2015ka, qaraarka wuxuu ka kooban yahay 21 qodob,waxaa inoo akhrinaya Xildhibaan:Cabdi Bare.

Xildhibaan:Cabdi Bare Cali oo ah Xubin Guddiga Maaliyadda,wuxuu Golaha Shacabka ka hor akhriyay qaraar ka kooban 21qodob.

Markuu Arkay: Qodobka 69 FAQ. 2aad(b) ee Dastuurka J.F.S.

Markuu Arkay:talo soo jeedinta Guddiga Maaliyadda iyo Qorshaynta Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Lambar GM&Q/BFS/125/2015 ee 25/07/2015,kuna saabsan warbixinta dakhliga iyo kharashka Dowladda ee bilaha Janaayo-Maajo 2015 iyo arrimaha la xiriira.

Markuu Arkay: Warbixinta Hanti Dhowrka Guud ee qaranka eek u saabsan isla arrinta dakhliga iyo kharashka Dowladda ee bilaha Janaayo – Maajo 2015

Markuu Garwaaqsaday :in ay jiraan khaladaad ka dhacay maamulka dakhliga iyo kharashka dowlada sannadihii 2013,2014, iyo 2015.

Markuu Ogaaday : Baahida loo qabo in sixitaan buuxa iyo dabagal lagu sameeyo khaladaadka ka dhacay maamulka hantida dowladda ee sannadaha kor ku xusan.

Kalfadhiga 6aad Kulankiisii 36aad ee taariikhdiisu ahayd 26/08/2015, wuxuu ku go'aansaday **Qaraarka** ay qodobadiisa hoos ku qoran yihiin, **Fiiri Lifaaqa.**

Xildhibaan:Cabdi Cali,wuxuu soo jeediyay,shirkadaha shisheye shaqaalaha ujooga waa in canshuur laga qaada,waxaan ku daraya wasaaradda maaliyadda in ay deg deg ugu dhaqaaqdo howsha ay qabato Qod.17aad, Rai'salwasaaraha waxaa la faraya hishiisyada cusub ee ay galeyso dowladiisa in ay ka diiwan galiyaan Hanti dhowrka guud.

Xildhibaan:Tahliil,wuxuu sheegay,immegrationka lacagta ka soo xaroota cid og malahan halka ay ku dhacdo dhaqliga dowlada kuma biirto waa in dabagal lagu sameya, canshuurta qaadka laga qaado waxaa la geya xafiiska wasiirka ganacsiga halka uu geeyo cidna ma su'aasho guddiga maaliyadda waa in ay dabagal ku sameysa labadaas meelood.

Xildhibaan:Axmed Geele Xaaf,wuxuu soo jeediyay,canshuurta dalka u soo xarooto waa ay tiro badan tahay waxna qasnada dowlada ayay galaan waxna waalala baxsadaa taasna dabagal keeda waxaa laga rabaa Hanti dhowrka guud iyo xisaabiyaha guud waa howshooda , bisha Oct-Sept waxaa Airporka laga qabtay lacag ka badan $5000 000 halkey aaday,guddiga maaliyada waxaa la idinka rabaa dabagal, dadka masaakiinta oo ganacsatada yar yar iyo bajajka ayaa canshuur laga qaadaa, laakiin hotelada iyo maqaayadaha waaweyn cid wax ka qaado malahan sidaa daraadeed guddiga maaliyadda waa in aad xil iska saartan, xamar lacag wey taala weyna nagu filantahay.

Xildhibaan:Cabdirisaaq Jurile,wuxuu sheegey,guddiga maaliyadda waa mahadsan yihiin qaraarka ay noo soo diyaariyan qodobada ku qoran waa munaasab kuligood,, waxan ku dari lahaa in la mudeeyo waxaan Barlamaanka ka codsan lahaa in loo codeeyo oo la ansixiyo ka dibna guddiga maaliyadda uu dabagal ku sameyo Guddoonkana uu la socodsiiyo wixii hirgala wixii socon wayana uu soo gubiyo, ka dibna qaraarka dib noogu soo celiya.

Guddoomiye, Jeylani Nuur Iikar,wuxuu soo jeediyay,waa sax qaraarka hadii la ansixiyo waxaa daba galka iska leh guddigii soo diyaariyay qaraarka, guddigaa laga rabaa in uu la xisaabtamo wasaaradaas ama hay'adii qaraarka laga diyaariyay, Barlamaanka wuxuu xaq uleeyahay in uu u yeero wasiirka.

Xildhibaan:Cabdi Dhuxulow,wuxuu sheegay,meesha dhaheysa in lagu daro saraakiil Dekada iyo Airporka in loo bedelo xisaabiye idman loo magacabo, waxaan rabilahaa shararka ay ku leeyihiin sharkadaha lagu soo cadeeyo, waxaan qabaa saaxiibaday in la tijaabiyo hal wasiir oo lagu soo fuliyo xeer ilaaliyaha guud iyo hanti dhowraha halkan ayay ka cadeyan in 19 wasaaradood ay lun sadeen lacag cid wax ka qabatay malahan.

Xildhibaan:Maxamed Cumar Dhalxa,wuxuu soo jeediyay,jasiira cusbada ka soo baxda hadii la dhoofiyo malaayiin dolar baa laga helaya lacag farabadan baa laga qaada manaqan meshay gasho, maxay kala socdan guddiga lacagaha lagu soo shubo Dastuuriga **Lamberka 252** maxay kala socdan lacago faro badan ayaa u taal aduunka maxey guddiga nooga sheegi karta guryo badan oo ku yaala dalka Djabouti mise iyagaa noo haya? Xukuumada maxey u sameyn weyday xeer iyo sharci? Maxaa Dekada xamar ku soo koobay Dekado badan baa dalka ku yaala?

Safarada lacagaha la xiriira ee Baarlamaanka ayagana xagey maraan?

Xildhibaan: Shuuriye,wuxuu sheegay, 25ka wasaaraddood 16 ka mid ah ayaa sameysa xisaabo iyo wax ku dhaca qasnada waa in la fariisiyo dakhliga Dowlada ee soo xarooda, waxaan ansaxinay hanti dhowr awoodban siinay waa in loo yeera oo uu cadeeya 19kii wasaaradood oo lunsadan lacagta mesha ay mareyso.

Xildhibaan:Cabdulahi Jaamac Xuseen,wuxuu soo jeediyay,qeybta sharci dajinta,fulinta iyo garsoorka waa fadhiyan waana shaqeyan, gacan gadaal ka baqeysa horey wax kama go'yso, musuq-maasuq ma shaqeynayo, waxan soo jeedinaya in sharciga sareyo si uu u shaqeyo aana galno heshiis lagu soo qabto cidkasto.

Xildhibaan:Maxamed Aamiin,wuxuu sheegay, Qod.3aad ee Qaraarka waxaan ku dari lahaa in lagu xoojiyo sharciga shaqaalaha shisheeye ee Barlamaanka Ansixiyay ,Qod.7aad waa muhiim in Dekadaha dalka leys waafajiyo tariifada canshuurta, Qod.13aad in la xadido safarada ay aadayan madaxda wey badan yihiin, safarada gudaha iyo dibada waa in la kala cadeya, Qo.17aad heshiisyada ay dowlada la gasho dhinacyada kala duwan waa in laga diiwan galiya xafiiska hanti dhowrka guud ee qaranka, waa in lays wafajiya tariifada laga qaadayo nooca haya'd ama dibad ama gudaha.

Xildhibaan:Samaan Sheekh Daahir,wuxuu soo jeediyay, waa run ma jirto qolo kaligeed wax qaban karta Guddoonka iyo Baarlamaanka waxaan ka codsaneyna in ay nagu biiriyaan wixii macluumad ee dheeri ah oo ay hayan si howsheena noogu fududaato, anaga ma sameynin dabagal ee waxaan aamin saneyn in aan leenahay kormeer, waxaa jira hay'ado wax baara oo la keenay bishii 7aad 8aadna waa la soo gudbiyay, talooyin ayaan u baahanahay in nalasiiyo cidii khibrad u leh.

Guddoomiye Jeylaani Nuur Iikar, guddiga waan garab taaganahay waan la shaqeynayna sidoo kale xildhibaanada idinkana la shaqeya oo wixii dheeri ah oo aad heysan ku biiriya.

Kalfadhiga 7-aad Kulankiisa:11-aad, uu shir Guddoominayay Guddoomiye ku xigeenka 1aad Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane:Jeylani Nuur Iikar uu sheegay shirka in uu xiran yahay sacada madkey ahayd 1:00 gd.